

SUUXINTA CARRUURTA – MACLUUMAAD KU SOCDO WAALIDKA/MASUULKA

WAA MAXAY SUUXINTA/ANESTHESIA?

Suuxdintu waa halka oo ilmaha la siiyo dawooyin hurdo ka keena oo ka dhigta kuwa aan dareemin xanuun.

Waxaa had iyo jeer ugu yaraan, wada jooga hal dhakhtar oo suuxiyaha iyo kalkaalisada suuxinta oo wada shaqeeya marka ilmaha la suuxinayo. Waxaan leenahay hab-raacyo dhammaystiran oo ku saabsan sida suuxdinta loo sameeyo. Ilmaha si joogto ah ayaa ula soconna inta uu suuxsanyahay oo dhan.

MAXAAN UGU HORAYN RABNA INAAN KA OGAANO CARRUURTADA?

Waxaan heli doonnaa macluumaad ku saabsan xaalada caafimaad ee ilmaha sida miisaanka, jirrooyinkii hore, isticmaalka dawooyinka, xasaasiyadda iyo haddii aay jirto tariiq hore ee la suuxiyay.

Haddii ilmahaagu dhowaan xanuunsaday, fadlan nala soo xiriir si aan wadajir ugu go'aansanno waqti kale ammaan ah oo habboon. Ilmaha waa in la keenin isbitaal haddi ay jirto xanuun faafa sida busbus ama matag/shuban. Haddi ay dhacdo inuu ilmaha qabo hargab qandho iyo qufac leh, waxaan inta badan dib u dhignaa suuxdinta dhowr toddobaad. Waxaa ugu wanaagsan in ilmuhu caafimaad qabo intii suurtoagal ah marka la suuxinayo. La xirriir lambarka taleefanka aad ka helaysid warqaadka ogeeysiiska/SMS-ka.

Waxaan jeclaan lahayn inaan ogaano haddii ilmahaagu u nugul yahay lallabbo (tusaale ahaan, jirro markuu raaco baabuur/gaari), maxaa yeelay waxay bixin kartaa tilmaam inuu ilmuhu ku lallaboon karo suuxdiinta. Waxaan markaas siin karnaa dawooyin ka hortag ah lalabbada waxaana dooran karnaa qaabka suuxdinta ee ku habboon.

Waxaa laga yaaba inaad dareento, inaan dhowr jeer ku weydiinno isla su'aal inta aad isbitaalka joogtan (tusaale ahaan magaca, lambarka dhalashada iyo goortii ugu dambeysay inuu cunuga wax cuno ama cabo). Tani waxay u muuqan karta amid aan loo baahnayn, laakin waxa sabaab u ah badbaadada ilmahaaga.

DAAWOYINKA JOOGTADA AH

Haddii ilmuhu isticmaalo dawooyin joogta ah, kuwaani waa inaan la qaadan subaxda maalinta suuxdinta, laakin waa in la keenaa isbitaalka iyagoo wata liis cusub oo ah daawooyinka la isticmaalo. Dhakhatarka suuxinta ayaa go'aaminaya, kuwa ilmaha u ka qaadan karo daawooyinka joogtada ah maalinta suuxdinta. Waxaa ka reeban daawooyinka neefta loo qaato iyo daawooyinka qalalka – kuwaas ayaa loo qaadan karaa sidii caadiga ahayd waxaana intaa dheer in la keeno isbitaalka.

DOORKA WAALIDIINTA

Waalidka ayaa ah daawada ugu fiican ee xanuunka iyo welwelka. Waxaan ku talinaynaa in mid ama labada waalidba ay joogaan ilaa ilmuhu ka hurdo, haddii ilmuhu ka weyn yahay 6 bilood. Ka digtoonow in waqtiga suuxinta, shaqaalaha suuxdintu ay xoogga saari doonaan inta badan ilmaha.

Waxaa muhiim ah in adiga / iyaga aad u muuqdaan kuwo deggan oo ammaan ah, maxaa yeelay deggenaashaha ayaa u gudbinaysa ilmaha.

Way adkaan kartaa in laga tanaasulo xakamaynta ilmaahaga oo loo dhiibo shaqaalaha suuxinta ee shisheye. Annaga, oo daryeeli doona ilmahaaga, ayaa si weyn u fahansan tan.

DIYAARINTA ILMAHA SUUXINTA KA HOR

Halkaan waxaa ku jira talooyin wanaagsan ku socdo qofka u raaci doona carruurta suuxdinta.

Ka hor suuxinta

-Si fudud oo deggan ugu sharax ilmaha waxa dhici doona ka hor suuxdinta. Carruurta ka yar 6 sano, haddii ay surtogonal tahay waxaa loo sheegi kara 2-3 maalmood ka hor booqashada isbitaalka, carruurta ka weyn 6 sano u sheeg toddobaad ka hor

-Isticmaal hadda rabto kaalmooyinka sida taxanaha sawirrada, buugaagta iyo filimada aad ka hesho websaydhkan

-ka jawaab su'aalaha ilmaha, badanaa carruurta waxay u baahan yihiin inaay dhowr jeer ku weydiiyaan

-Mar walba runta sheeg, si ilmuhu noogu aamino xaalado kaleba

-Ha ka been sheegin hababka aan fiicnayn ee xanuunka leh, laakiin xoogga saar waxa la sameeyn karo si loo yeero raaxo-darada

-Sii cunuga doorashooyin macquul ah sida inay iyaga dooran karaan xayawaanka cufan oo aay rabaan inuu u raaco qolka qalliinka

-Ku deji ilmaha in aad ku kalsoon tahay in ilmuhu si fiican uga gudbi doono

-Deggeenaan muuji oo isku day inaad qariso kalsooni darada. La soco luuqadda jirkaaga.

-Xor ayaad u tahay inaad nooga sheegto khibradihii hore ee aad soo martay. Annaga oo kula jirna, waxaan samayn karnaa qorshe wanaagsan oo hirgelin ah.

Xilliga suuxinta

-Si buuxda xoogga u saara ilmaha, shaqaaluhu waxay daryeelayaan wax kasta oo kale

-Ka fogow sasabada xad-dhaafka ah, tani waxay ilmaha u xaqiijin doonta in xaalada tahay mid laga baqo

-La soco xulashada ereyada-adeegso odhaahyo togan. Dheh "waad samayn kartaa tan" halkii aad dhihi lahayd "Ha cabsan"

-Ka weecitaanku aad buu u qiimo badan yahay: heesaha, alaabta carruurta ku ciyaarto, buufinta saabuunta biyaha lagu qasay, sawirro, ciyaaro/filimaan ayaa inta badan si fiican u shaqeeya.

-Go'aaminta ka timaadda cunugga waa muhiim: waxaan isku dayi doonnaa inaan tixgelinno tan haddii xaaladuhu oggolaadaan, tusaale ahaan in ilmuhu dooran karo inuu rabo inuu ku fadhiisto dhabta ama kursi jiifsado, inuu doorto midabka faashadda iwm.

-Haddii ilmuhu ooyo, u xaqiiji ilmaha inuu sii fiican u fiican yahay. Ka fogow dhaleeceynta, raaligelinta ama gorgortanka.

-Naftaada deji – degenaanshaha waalidka wa mid u gudbo ilmaha.

Suuxinta kadib:

-Sii cunugga xaqiijin iyo aqoonsi, xitaa haddii ay ahayd mid xaalad adag

-ka sheeke wixii si fiican u dhacay iyo sida'aad u isticmaali kartaan marka xigta. Oo hore u soco – u wareeji wada hadalka mawduucyada maalinlaha ah iyo waxa aad rajaynayso marka guriga tagtaan, lama rabo sheekada inaay ku koobnaato joogitaanka isbiitalku keliya.

-Qaar ka mid ah carruurta ayaa ku raaxeysta ka shaqeynta wixi ku dhacay iyago wax ka sawiraayo.

-Xaqiiji kartidooda: «Hore ayaad u samaysay, mark kale waad samayn kartaa» iyo «mar kasta oo aad samayso, xooga ayaad ku sii fiicnaanaysaa»

Ku saleysan qoraalka «ka caawi ilmahaaga sidii uu ula qabsan lahaa qaliinka iyo waxqabadya xanuunka leh» ee ka yimid Vindencenter for xanuunka carruurta, isbiitalka qaranka, DK

MAXAAD U SOO QAADANAYSA ISBITAALKA?

Soo qaado dawada ilmahaaga ee joogtada ah.

Waqti badan oo sugitaan ayaa ka dhici karaa isbitaalka. Markaa waa hagaag inaad keento wax uu ilmuhu jecel yahay inuu isku maaweeliyo sida, alaabta carruurta ku ciyaarto, buugaag/buugaag maqal ah, bugaagta waxqabadka leh iyo tableedka. Xor ayaad u tahay inaad carruurta ka qaybgeliso xirxirrida iyo so qaadista waxay rabaan inay keenaan isbitaalka. Waxyaabah kalsoonida abuuraya sida mujuruca carruurta nuugan, xayawaanka cufan ama marooyinka carruurta jecayl-yihiin ayaa wanaagsan in la keensado.

SOON

Waa maxay sabaabta inuu ilmuhu soo soomo?

Marka Suuxinta la smeeyo, muruqyada ayaa dabcaayo. Haddii calooshu buuxsantahay, waxa caloosha ku jira ayaa geli karaa hunguriga, waxay u gudbi kartaa sambabbaha waxayna keeni kartaa oof-wareen. Badbaadada ilmaha awgeed, waxa aad muhiim u ah in la dhawro xeerarka soonka.

Waa maxay xeerarka soonku?

Xeerka ugu weyn waa:

Biyaha, casiirka iyo casiirka tufaaxa: ilaa 1 saac ka hor suuxinta. Ilmaha waa in lo so bandhigaa, laakin aan lagu qasbin inuu cabbo.

Caanaha naaska iyo kuwa la qasko oo bedelo kuwa naaska: ilaa 4 saacadood ka hor suuxinta

Muuska/mooska caanaha fadhiya: ilaa 4 saacadood ka hor suuxinta

Cuntada kale iyo caanaha lo'da: ilaa 6 saacadood ka hor suuxinta

Ogoow in xaaladaha qaarkood laguugu soo wargelin karo waqti soon oo ka dheer kuwa kor lagu sheegay.

SUUXINTA MAQAARKA

Emla, oo inta badan ugu yeerno «kareemka indho-sircaadka», waa suuxdin gudaha ah oo maqaarka si ku-meel-gaar ah kabuubisa. Sida darteed EMLA waxay aad ugu habboon tahay mararka maqaarka la saraayo. Waxaan rabna sidaa darteed in dhammaan carruurta xirtaan EMLA ka hor inta laga qaadin tijaabo sariin ah. Daawada waxaa lagu iibiyaa warqad dhaktar la'aan waxaana la heli karaa labadaba kareem iyo balastar caafimaad.

Si fiican u sii qorshee goorta aad Emla u adeegsan doonto ilmahaaga, maadaama ay tahay inay mesha ku fadhiisato 1 saac si ay saamaynta ugu badan u yeelato. Dhig ama saar EMLA dusha sare xididda dhiigga ee muuqda xagga dambe ee gacanta, xusulka ama cagta.

Carruurta ugu yar waxaa jira xaddidaadyo isticmaalka:

0-2 bilood: Ilaa 1 g kareem ama 1 balastar maalintii. EMLA waa in mesha laga saara 1 saac kadib.

3-11 bilood: Illaa 2 g kareem ama 2 balastar maalintii. EMLA waa in mesha laga saara 1 saac kadib.

1-5 sano: Illaa 10 garaam oo kareem ah ama 10 balastar/maalinti. EMLA waxa la haysan karaa 1-5 saacadood.

6-12 år: Illaa 20 garaam oo kareem ah ama 20 balastar/maalinti. EMLA waxa la haysan karaa 1-5 saacadood.

Carruurta cambaarta leh, kaa ilaali in meshaa cambaarta lagu dhejiyo daawada, ama. Ka saar balastarka EMLA 30 daqiiqo kadib.

Xusuusnow: ha u ballan qaadin cunugga in mudista gebi ahaanba xanuun lahayn, maadama aysan had iyo jeer sidaas ahayn.

DAAWOYINKA DEJINTA (DAAWADA KA HORTEGIDA) KA HOR SUUXINTA

Carruurta si kala duwan ayaay uga falceliyaan joogitaanka isbitaalka. Haddii ilmuhu welwelsan yahay, waxaa laga yaaba inay ku caawiso inaad hesho dawooyinka dejiya. Daawanyta hore ayaa siyaabo kala duwan loo siin karaa: waxaa ugu badan waa dawada dareeraha/sharoobo (midazolam), sanko laga buufiyo (dexdor) ama kiniin (vival iwm). Wakhtiga ay qaadato qaadashada daroogada ilaa saamaynta waxay ku xiran tahay hadba dawada la doortay.

Annagu si joogto ah ma siinno dawaynta ka hortegida dhammaan carruurta. Adiga si fiican u yaqaan carruurtada waxaana naga caawin karta inaan go'aansanno haddi tani waxtar u yeelan doonto ilmahaaga.

NOOCYADA KALA DUWAN EE SUUXINTA

Suuxdinta waxa lagu bilaabi karaa siyaabo kala duwan:

Haddii lagu bilaawo maaskarada, ilmuhu wuxuu seexdaa isagoo maaskaro kuu neefsanaya daawada suuxinta. Maaskaradu waa inuu si fiican ugu dhegnaado afka iyo sanko si uu u shaqeeyo. Gaaska suuxinta wuu yara ura. Waxay qaadata dhowr daqiiqo in ilmuhu seexdo. Markay u sii socdaan hurdo suuxdin oo qoto dheer, ilmuhu inta badan wuu dhaqaaqa. Tani gabi ahaanba waa caadi iyo sidii la filayay.

Suuxinta xididdada, qofka ayaa toos dawada hurdada looga siina xididdada dhiiga. Tan waxa lagu sameeya marinka iyado la isticmaalayo venflon/kanooole kaas oo ah tuubo caag ah oo lagu muday irbad oo loo isticmaalo in lagu siiyo daawo ama dheecaan. Suuxinta xididka wa mid dhakhsa badan oo ilmuhu wuxuu sexda dhowr ilbidhigi gudaheed oo jidhku wuxuu noqodka mid culus oo dhutiya. Taas waxay noqon kartaa wax aad u culus inay waalidiinta la kulmaan, gaar ahaan haddii aan hore loogu si wargelin. Ogow in shaqaalaha suuxdintu si fiican u daryeeli doonaan ilmaha dhammaan inta ay ku jiraan marxaladaha suuxinta.

Mararka qaarkood ilmuhu wuxuu ku fadhiisan karaa dhabta hooyada ama aabaha markan bilowno suuxdintu si aan ugu abuurno xaalada u wanagsan ilmaha. Haddi xaaladu saamaxdo, waxaan ku dadaali doona wada-tashiga ilmaha.

Ka dib marka ilmuhu seexdo, shaqaalaha ayaa qolka idinka kaxeeyn doona. Dhanka kale, waxaan hubin doonnaa in ilmuhu mar kasta caafimaad qabo.

Carruurta qaarkood ee qalliin lagu sameeyo waxaa lagu siin doonaa suuxdin agagaarka neerfayaasha (xannibaad) si ay ugo noqdaan xanuun baabiye wanaagsan aagga qalliinka. Tan hore ayaa lagugu wargelin doonaa.

HAWLGALKA KA DIB: KA KICINTA HURDADA IYO XANUUN YAREYNTA

Isla marka suuxdintu dhammaato, waan ku soo wici doonnaa. Ilmaha waxaa loo wareejin doonaa qaybta la socodka halkaas oo ilmaha aay daryeeli doonaan kaalkaaliyayaasha daryeelka degdegga ah. xeerka ugu weyn ayaa ah in uu la joogi karo hal waalid oo keliya qaybta la socodka, maadaama ay sidoo kale jiraan bukaanno kale oo dhowaan la qalay oo u baahan deggena.

Inta uu ilmuhu ku jiro waaxda la socodka waxay ku xiran tahay da'da ilmaha iyo nooca baaritan ama qalliin. Haddii aay noqot in uu ilmuhu ku sugnaado qaybta la socodka habeen, mid ka mid ah waalidiinta ayaa la siiya sariir agta ilmaha.

Waxaan rabnaa in ilmuhu soo jeedo, si fiicanna uga nafiso xanuunka (hadii qaliin lagu sameeyay) iyo inuu ahaado lallabo la'aan ka hor intaanu ilmuhu ka bixin qaybta la socodka. Haddii ilmuhu dhabarka ku leeyahay xidid la xannibay, waxaan hubin doona in ilmuhu kaadinayo ka hor intaadan isbitalka ka bixin. Xannibada noocan oo kale waxay bixisaa xanuun-yareyn wanaagsan, laakin waxay sabaabi kartaa faruuqinta kaad-haysta oo so daahdo.

Marxaladda baraarugta ama kicinta, waxaa muhiim ah in ilmuhu is dejiyo oo keligiis tooso. Sidaa darteed waxaan ka fogaaneynaa kicinta ilmaha oo loo baahnayn. Ka digtoonow in carruurta qaarkood xooga deggeenan la'an iyo xanaaq ka muuqdo marka ay ka soo toosayaan suuxdinta.

MARKAAD GURIGA TIMAADAN

Ka hor intuusan ilmuhu isbitalka ka bixin, waxaad heli doontaa macluumaad wanaagsan, tusaale ahaan xanuun joojinta, faashadda oo la beddelo. Natiijada baaritaanka ama la socodka kale oo heli doontaan. Carruurta qaar ayaa lagaa yaabaa inay lallabadaan markay guriga ku noqdaan. Waxay noqon karaan kuwo daalan oo aan xasilloonayn, marka hubi inaysan is-garaacin ama wax is yeelin. Raac talooyinka lagu yareeyo xanuunka haddii ilmuhu qaliin galay. Qalliinka maalinta lagu sameeyo carruurta waa in la kormeero habeenki.

MIYAAD RABTAA INAAD LA HADASHO DHAKHTARKA SUUXINTA KA HOR INTAADAN IMAAN ISBITAALKA?

Waa lagugu soo dhaweynayaa inaad nala soo xiriirto.

Lambarka taleefanka xafiiska suuxinta (maalmaha shaqada 08-15): 51 51 32 26

Xoghayuhu oo taleefanka ka qabto ayaa diyaarin doonaa xiriir inaad la yeelato dhaktarka suuxinta, kaaso dib kuugo so celin doona taleefan.